



Su'aalaha Inta Badan La Iswaydiiyo Hirgelinta Heerka Lacageed ee Compass

[Compass Project ee Guud](#)

[Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon \(ONA\)](#)

[Waxyaabaha la iska reebay](#)

[Isbeddelada Heerarka Lacageed](#)

[Kala saarida/Soocida: Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah \(DNS\) & Xirfadlaha](#)

[Adeega Hab-dhaqanka](#)

Boggaga 1-4

Boggaga 4-7

Boggaga 7-8

Bogga 9

Boggaga 9-12

Compass Project ee Guud	
Su'aal	Jawaab
Waa maxay Compass Project?	<p>Compass Project waxaa abuuray Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) si loo wanaajiyo habka dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinku uga qayb qaataan adeegyada.</p> <p>Compass Project waxaa ka go'an bixinta:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Macluumaad si fudud loo heli karo oo si sahlan loo fahmi karo. • Nidaam qorsheyn oo fudud oo dabacsan. • Adeegyada iyo taageerada adiga lagu qorsheeyay.
Sidee buu Compass Project u beddeli doonaa adeegyadayda?	<p>Compass Project wuxuu wanaajiyaa habka dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinku uga qayb qaataan adeegyada. Qaabkan qofka ku saleysan ee cusub wuxuu naga caawiyaa in aanu qof walba si gaar ah u barano oo si fiican ugu fahamno waxa looga baahan yahay noloshooda si ay u gaaraan hadafkooda. Nidaamkan cusubi waa daahfurannaan dheeraad ah leh, fudud oo dabacsan wuxuuna bixiyaa adeegyo iyo taageerooyin loogu talagalay qofka.</p> <p>Compass Project wuxuu isticmaalaa hal habka qiimeynta ah oo loo yaqaano Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA). Su'aalaha qaarkood ee ka tirsan ONA waxay gacan ka geysan doonaan ogaanshaha kooda adeega ee kugu habboon iyada oo lagu saleysano</p>



Compass Project ee Guud	
Su'aal	Jawaab
	<p>baahiyahaaga taageero. Kooxaha adeega ayaa qeexa adeegyada ay dhici karto in ay kugu habboon yihiin marka aad gasho nidaamkaaga qorsheynta ee Qorshahaaga Taageerada Shakhsi (ISP).</p> <p>Dadka iskood u nool ama qoys la nool, kooxda adeegu waxay ogaan doontaa saacado kala duwan oo ku habboonaan kara in la isticmaalo inta lagu jiro habka qorsheynta ISP. Isbeddelkani ma dhici doono ilaa laga gaarayo 2023. ODDS waxay wakhti hore ula xiriiri doontaa kuwa ay saameeyeen.</p> <p>Dadka ku nool goobaha la degan yahay, sida guryaha koox ahaanta loo degan yahay, kooxda adeegyada ayaa aqoonsan doona heerka lacageed ee loogu talagalay adeegyada uu daryeel bixiyuhu heli doono si uu ku taageero.</p> <p>Dadka intooda badan ma arki doonaan isbeddel ku yimaada adeegyadooda. Si kastaba ha ahaatee, koox yar oo ka mid ah dadka ayay dhici kartaa in wax laga beddelo saacahadooga iyada oo ay ku saleyn baahiyahooda gaarka ah.</p>
Goorma ayaa Compass Project la qaban doonaa?	Mashruuca Compass waa mid socda wuxuuna ku saabsan yahay hagaajinta habka dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinku uga qayb qaataan adeegyada. ODDS waxaa ka go'an qiimeynta nidaamka iyo dhageysiga jawaab celinta ka socota dadka iyo qoysaska. Ilaa xad, Compass Project waa la qiimeyn doonaa waxaana suurtagal ah in la cusbooneysiyo si loo xaqiijiyo in baahiyaha dadka la buuxiyo.
Miyuu Compass Project iga dhigi doonaa in aan beddelo daryeel bixiyahayga?	Maya, lagaagama baahna in aad bedesho daryeel bixiyahaaga Compass Project dartiis. Compass wuxuu ku siin doonaa macluumaad dheeraad ah si uu kaaga caawiyo in aad sameyso kala



Compass Project ee Guud	
Su'aal	Jawaab
	doorashooyin wanaagsan oo ku saabsan adeegyadaada iyo cidda sida ugu fiican u bixin karta.
Waxaan helaa adeegyada nolosha ee la taageero. Sidee bay ii saameyn doontaa?	Kuma saameyn doonto hadda. Mustaqbalka, heerka lacageed ee la siiyo daryeel bixiyahaagu wuu isbeddeli karaa, iyada oo ku xiran kooxda adeega ee lagu qoondeeyay, laakiin waxba kama beddeli doono adeegyadaada.
Waxaan ku noolahay daryeelka ilmo korsiga. Sidee bay ii saameyn doontaa?	Kuma saameyn doonto hadda. Mustaqbalka, heerka lacageed ee la siiyo daryeel bixiyahaagu wuu isbeddeli karaa, iyada oo ku xiran kooxda adeega ee lagu qoondeeyay, laakiin waxba kama beddeli doono adeegyadaada.
Waa maxay sababta Compass Project uu dhacayaa?	<p>Compass Project waxaa abuuray Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) si loo wanaajiyo habka dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinku uga qayb qaataan adeegyada.</p> <p>2013-kii, Sharci-dejin ayaa fartay ODDS in ay sameyso habka qiimeynta baahiyaha oo hal ah, isku dhafan si loola isticmaalo qof kasta oo adeegyo ka hela ODDS. Tani waxay keentay abuurista Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA). Habkan cusub waa mid xaqiiqada ku saleysan waxaanu lagu abuuray fikrado laga helay kooxda daneeyayaasha ee weyn.</p> <p>ODDS waxay hadda ka shaqeynaysaa adeegsiga habkaasi si loo hubiyo in ay jiraan daahfumaan buuxda oo ka jirta nidaamka; dadku fahmaan inta saacadood ee ay heli doonaan adeegyada; waxayna hubin doontaa in daryeel bixiyayaasha si habboon lacagta loo siiyo.</p>
Ma dooran karaa in aanan ka qayb qaadan Compass Project?	The Compass Project wuxuu wanaajinayaa dhammaan qaybaha kala doorashada bixinta adeega I/DD ee Oregon.



Compass Project ee Guud

Su'aal	Jawaab
Waxaan u noolahay si iskay ah ama guriga qoyskayga, goorma ayay saameyn doontaa saacadaha adeega ee aan helo.	ODDS waxay isticmaalaysaa heerarka lacageed ee cusub oo loogu talagalay daryeel bixiyayaasha qaarkood Luulyo 1, 2022 — tani ma beddeli doonto adeegyadaada, kaliya sida daryeel bixiyayaasha qaarkood lacagta loogu soo celiyo. Qoondaynta cusub ee saacadaha guriga-dhexdiisa lama isticmaali doono ilaa laga gaarayo 2023, iyada oo ODDS ay macluumaad wakhti hore siin doonto adiga iyo qof kasta oo ay saameeyeen isbeddelada si aad u haysato wakhti kugu filan oo aad ku qorsheysato wixii isbeddelo ah.

Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA)

Su'aal	Jawaab
Miyay Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA) go'aamiyaan saacadaha adeegayga?	Fadlan ogow in isbeddelada soo socdaa aysan dhici doonin ilaa laga gaarayo 2023. Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA) waxay naga caawintaa doontaa in aanu kuu helno adeegyada iyo taageerooyinka u fiican adiga iyo qoyskaaga. Natiijoyinka ONA ayaa ku siin doona saacado kala duwan oo aad isticmaali karto oo ka tirsan nidaamka Qorshahaaga Taageerada Shakhshi (ISP). Inta lagu jiro kulanka ISP, waxaad la shaqeyn doontaa maamulahaaga kiiska iyo kooxdaada si go'aan looga gaaro inta saacadood ee taageerada aad u baahan tahay iyo sida loo isticmaali doono si loo gaaro hadafyadaada gaarka ah. Fadlan ogow in isbeddeladani aysan dhici doonin ilaa laga gaarayo 2023. ODDS ayaa macluumaad wakhti hore siin doonto adiga iyo qof kasta oo ay saameeyeen isbeddeladu si aad u haysato wakhti kugu filan oo aad ku qorsheysato.
Waa maxay Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon maxayna tahay sababta aan ugu baahanahay in aan mid haysto?	Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (oo mararka qaarkood loo soo gaabiyo "ONA" oo loogu dhawaaqo "OH-nuh") waa qiimeyn sanadle ah oo la iskaga baahan yahay , oo ah hab naga caawiya in aanu barano qof walba oo aanu la shaqeyno oo si fiican ugu fahamno waxa ay u baahan yihiin noloshooda si ay u gaaraan hadafkooda.



Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA)

Su'aal	Jawaab
	<p>Hal mar sanadkii, qof wax qiimeeya ama maamulaha kiiska ayaa kula eegi doona Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon oo ku weydiin doona su'aalo ku saabsan waxa aad u baahan tahay noloshada. Tani waxay naga caawin doontaa in aanu kuu helno adeegyada iyo taageerooyinka u fiican adiga iyo qoyskaaga. Waxaad sidoo kale maamulahaaga kiiska ama xubnaha kale ee ka tirsan kooxdaada taageerada ka codsan kartaa in ay kaa caawiyaan tani, haddii taasi tahay mid kalsooni dheeraad ah kuu leh.</p> <p>ONA waa hal hab oo beddeli doona habka qiimeynta kala duwan ee hadda la adeegsado si loo go'aamiyo heerarka lacageed iyo saacadaha. ONA waxaa loo isticmaalaa in lagu go'aamiyo dhowr shuruudood oo sanadle ah, sida Heerka Daryeelka, Aqoonsiga Halista, Xaalada La Wanaajiyey iyo Kooxaha Adeega. Xeerarka federaalka ayaa uga baahan qof kasta oo hela adeegyada Medicaid dhaqaalihiiisa bixiso ee ku saleysan guriga iyo bulshada uu helo Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon.</p>
<p>Sidee bay tani uga duwan tahay qiimeyntii aan soo maray wakhtiyadii la soo dhaafay?</p>	<p>Wakhtiyadii la soo dhaafay, waxaa jirtay tiro qiimeyn oo kala duwan oo la adeegsaday si loo fahmo baahiyaha dadka. Qiimeynta waxaa lagu ogaaday tirada saacadaha adeega ee qof kastaa helay, iyo sidoo kale waxa ay yihiin heerarka lacageed ee la siiyay daryeel bixiyayaasha. Foomamkani waxay qaateen waqti badan oo aad leedahay, waxay noqon karaan jahwareer, waxayna abuureen iswaafaqsanaan la'aan. Hadda, dhammaan qiimeyntaasi waa la isku daray oo laga dhigay hal nidaam oo wax ku ool ah oo ka tirsan Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon.</p>
<p>Miyay Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon beddeli doontaa heerka lacageed ee Daryeel bixiyahayga?</p>	<p>Laga bilaabo Luulyo 1, 2022, ONA waxay gacan ka geysan doontaa go'aaminta heerka lacageed ee ku habboon ee loogu talagalay daryeel bixiyayaasha, oo ay ku jiraan Guryaha Dadka Waayeelka ahi Koox ahaanta U degan yihiin, iyo Taageerada</p>



Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA)	
Su'aal	Jawaab
	Hawlaha Maalintii iyo Bixiyayaasha Shaqada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida heerarka lacageed loo go'aamiyo waxaa laga heli karaa https://go.usa.gov/xtfnT .
Ayaa i siin doona Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon?	Dad badan, maamulhooda kiiska ayaa sameeyay qiimeyntii hore. Hadda, qof cusub oo si gaar ah loo tababaray, oo loo yaqaan qiimeeyaha, ayaad isla eegi doontaan nidaamkani. Haddii aad jeclaan lahayd, maamulahaaga kiiska ama kuwo kale ayaa kula joogi kara inta lagu jiro qiimeynta si ay kaaga caawiyaan ka jawaabida su'aalaha. Mararka qaarkood maamulaha kiiska ayay dhici kartaa in uu u baahdo dhammeystirka ONA aad leedahay halkii uu ka noqon lahaa qof wax qiimeeya.
Waa maxay sababta Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon ay u weydiiso su'aalo shakhsi ahaaneed?	Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA) waxay naga caawisaa in aanu barano qof walba oo aanu la shaqeyno oo si fiican ugu fahamno waxa ay u baahan yihiin noloshooda si ay u gaaraan hadafkooda. Si tani loo sameeyo, waxaanu weydiinaa su'aalaha shakhsi ahaaneed si loo go'aamiyo taageerooyinka gaar ah ee aad u baahan tahay si aan ku siin karno taageerooyinka u fiican adiga iyo qoyskaaga.
Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon ma mid qarsoodi ahbaa?	Haa, ONA waa mid qarsoodi ah. Qofka maraya qiimeynta, ama daryeelihisa/mas'uulkiisa, waxaa la siin doonaa nuqulka ONA oo la dhammeystiray. Daryeel bixiyahaagu sidoo kale wuxuu codsan karaa nuqul. Marka laga reebo adiga oo si gaar u codsada in aan ONA aad leedahay lala wadaagin daryeel bixiyayaashaada, maamulahaaga kiisku waxaa dhici karta in uu natiijooyinkaaga ONA la wadaago daryeel bixiyahaaga.



Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA)

Su'aal	Jawaab
Maxaa dhacaya haddii aanan ku raacsanahayn sida Qiimeyntayda Baahiyaha ee Oregon loo qiimeeyo/dhibco loo siiyo?	<p>Haddii aadan ku raacsanayn natiijooyinka ONA aad leedahay, la socodsii maamulahaaga kiiska wuxuuna la socon doonaa qiimeeyaha.</p> <p>Qiimeeyaha ayaa qiimeyn doona tabashada jarta, oo beddeli doona ONA ama soo sheegi doona sababta qiimeynta/dhibco u yeelida loo doortay. Waxaa dhici karta in uu codsado macluumaad dheeraad ah ama dokumentiyo. Haddii aadan weli ku raacsanayn, waxaad cabasho u gudbin kartaa ODDS. ODDS ayay dhici kartaa in ay dib u eegto ONA aad leedahay ama ONA cusub ayay kuu buuxin kartaa.</p>

Waxyaabaha la iska reebay

Su'aal	Jawaab
Maxaa ka reeban?	<p>Adeegyada guryaha la degan yahay ee 24 saacadood ah, iska reebida waxaa loogu talagalay heerka lacageed ee adeegyada daryeel bixiyahaaga. Wax iska reebida ayaa loo baahan karaa haddii daryeel bixiyahaagu u baahan yahay dhaqaale dheeraad ah si uu lacag u siiyo shaqaale dheeraad si lagu taageero. Adeegyada guryaha la degan yahay ee 24 saacadood ah waxay ku siiyaan taageero afar iyo labaan saacadood ah, iyada oo wax iska reebidu aysan beddelin tani. Maamulahaaga kiiska ayaa la shaqeyn doona daryeel bixiyahaaga oo gudbiya wax iska reebida haddii mid loo baahdo.</p>
Compass Project miyuu beddeli doonaa waxyaabaha la iga reebay ee la oggolaaday?	<p>Iyada oo loogu talagalay wax iska reebida goobta 24-saacadoodka ah, wax iska reebidu waxay ku saabsan tahay heerka lacageed ee daryeel bixiyahaaga. Iyada oo ku saleysan noocyada heerarka lacageed oo cusub ee bilaabmaya Luulyo, 1, 2022, heerarka lacageed ee loogu talagalay adeegyadaadu wey isbeddeli karaan. Adeegyadaadu sidoodii hore ayuu ahaanayaan.</p>



Waxyaabaha la iska reebay	
Su'aal	Jawaab
	Haddii heerarka lacageed isbeddelaan, daryeel bixiyayaasha ayaa go'aamin doona haddii ay u baahan yihiin in ay gudbiyaan codsiga wax iska reebida. Isku duwahaaga adeegyada ayaa la shaqeyn doona adiga iyo daryeel bixiyahaaga si loo go'aamiyo haddii codsiga wax iska reebida loo baahan yahay.
Waxaan leeyahay daryeel bixiye wanaagsan waxaan rabaa in aan sii haysto. Miyaan wax iska reebida u codsan karaa iyaga si ay u helaan lacag badan ama iyagu u awoodaan in ay lacag badan siyaan shaqaalahayga?	Heerarka lacag bixinta waxaa loo dejiyay sida heer la raacayo oo kale waxna lagama beddeli karo si lacag badan loo siiyo shaqaalahayga. Wax iska reebida waxaa kaliya loogu talagalay marka aad u baahan tahay taageero dheeraad ah.
Sidee baan u ogaan doontaa haddii aan u baanahay wax iska reebid?	Maamulahaaga kiiska ayaa la shaqeyn doona adiga iyo kooxdaada si loo ogaado sida taageerooyinka loo isticmaali karo si loo daboolo baahiyahaaga. Haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah oo ka badan waxa lagu heli karo qiimeyntaada ama heerarka lacageed ee Compass, oo aysan jirin hab kale oo lagu daboolo baahiyahaaga, maamulahaaga kiiska ayaa codsan doona wax iska reebid.
Miyay daryeel bixiyayaasha codsiga wax iska reebida si toos ah ugu gudbin karaan ODDS?	Daryeel bixiyayaasha u baahan iska reebida heerka lacageed ee adeega si loo taageero qof waa in ay la shaqeeyaan maamulaha kiiska. Maamulaha kiis ayaa la shaqeyn doona daryeel bixiyaha, qofka iyo kooxda ISP si loo go'aamiyo haddii uu ONA sax tahay ama haddii ay jiraan ilo kale. Haddii, tani ka dib, la go'aamiyo in wax iska reebid loo baahan yahay, maamulaha kiiska ayaa mas'uul ka ah dhammeystirka codsiga wax iska reebida iyo in loo gudbiyo ODDS. Maamulka kiisku waa in uu si dhow ula shaqeeyaa daryeel bixiyaha ee ku saabsan helitaanka macluumaadka loo baahan yahay, laakiin buuxinta iyo gudbinta foomku waa mas'uuliyada maamulaha kiiska. Maamulaha kiiska ayaa daryeel bixiyaha ku dari doona gudbinta email-ka ee codsiga wax iska reebida marka wax iska reebida loogu talagalay heerka lacageed ee daryeel bixiyaha.



Isbeddelada Heerarka Lacageed

Su'aal	Jawaab
Waxaa dhici karta in daryeel bixiyahaygu yeesho isbeddelka heerka lacageed. Miyay tani beddeli doontaa adeegyaga?	Maya, waxba iskama beddelayaan adeegyadaada iyada oo ay sabab u yihiin isbeddelada ku yimid sida daryeel bixiyahaaga lacagta loo siiyo. Waxaad sii wadan doontaa in aad adeegyadaada u hesho sida aad maanta sameyso. Uma baahnid in aad bedesho daryeel bixiyahaaga.
Miyuu isbeddelka heerka lacageed saameyn doonaa saacadahayga adeega?	Haddii aad iskaa u nooshahay ama guriga qoyskaaga oo aad sidoo kale hesho Taageerada Hawlaha Maalintii (DSA) ama adeegyada Shaqada, sida DSA aad leedahay ama bixiyayaasha Shaqada lacagta loo siiyo ayay dhici kartaa in ay isbeddesho. Laakiin waxba isma beddelayaan HADDA oo ku saabsan inta saacadood ee ah adeega guriga-dhexdiisa ee aad hesho.
Sidee baan u ogaan karaa waxa daryeel bixiyahayga loo siiyo lacag ahaanta?	Maamulahaaga kiiska ayaa bixin kara macmuulaadkani.
Maxay isbeddelada heerarka lacageed u dhacayaan?	Wakhtigii u dembeeyay ee daraasadda heerka lacageed la sameeyay waxay ahayd 2008-kii. Noocyada heerarka lacageed ee hadda jira waa kuwo aan wakhtiga la socon. Heerarka lacageed ee cusub wuxuu mushahar fiican siin doonaa daryeel bixiyayaasha wuxuuna u saamixi doonaa ODDS ay in ay ilaaliso nidaamka daryeel bixinta iyo shaqaalaha.

Kala saarida/Soocida: Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) & Xirfadlaha Adeega Hab-dhaqanka

Su'aal	Jawaab
Waa maxay kala saarida/soocida?	Hadda la joogo, daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay waxaa la siiyaa heer lacageed oo uu ku jiro dhaqaale loogu talagalay kalkaalinta iyo taageerooyinka hab-dhaqanka. Sababtani awgeed, ma dooran kartid daryeel bixiyayaal kala duwan oo loogu talagalay adeegyadani. Kala saarida/Soocida waxaa lola



Kala saarida/Socida: Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) & Xirfadlaha Adeega Hab-dhaqanka

Su'aal	Jawaab
	<p>jeedaa kala saarida heerarka lacageed iyo daryeel bixiyayaasha ee loogu talagalay labadan nooc ee taageerooyin. Laga bilaabo Luulyo 1, 2022, waxaad awoodi doontaa in aad doorato daryeel bixiyayaal kala duwan oo loogu talagalay Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) iyo Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka (PBS) haddii aad ku nooshahay guryaha koox ahaanta loo degan yahay.</p>
<p>Haddii aan ku noolahay guryaha koox ahaanta loo degan yahay, miyaan dooran karaa daryeel bixiye kala duwan haddii aan u baanahay Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) ama Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka (PBS)?</p>	<p>Laga bilaabo Luulyo 1, 2022, waxaad awoodi doontaa in aad doorato daryeel bixiyayaal kala duwan oo loogu talagalay Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) iyo Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka (PBS). Isku duwahaaga adeega ayaa dib kuula eegi kara liiska daryeel bixiyayaasha la aqoonsan yahay, (DNS & PBS) si looga soo doorto in ay kugu taageeraan gurigaaga koox ahaanta loo degan yahay.</p> <p>Waxaad sidoo kale dooran kartaa in gurigaaga koox ahaanta loo degan yahay kaa taageero adeegyada DNS ama PBS aad leedahay haddii ay oggolaato ODDS in la bixiyo adeegyadaasi.</p> <p>Waxaad sii haysan kartaa bixiyaha daryeelka 24-saacadood ah ee loogu talagalay DNS iyo PBS haddii daryeel bixiyayaasha ay oggolaato ODDS.</p> <p>Isku duwahaaga adeega ayaa dib kuula eegi kara liiska daryeel bixiyayaasha la aqoonsan yahay, (DNS & PBS) si looga soo doorto in ay kugu taageeraan gurigaaga koox ahaanta loo degan yahay.</p> <p>Waxaad sidoo kale dooran kartaa in gurigaaga koox ahaanta loo degan yahay kaa taageero adeegyada DNS ama PBS aad leedahay haddii ay oggolaato ODDS in la bixiyo adeegyadaasi.</p>



Kala saarida/Soocida: Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) & Xirfadlaha Adeega Hab-dhaqanka

Su'aal	Jawaab
<p>Sidee baan ku ogaanayaa in aan u qalmo Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) ama Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka (PBS)?</p>	<p><u>Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS):</u> Isku duwahaaga adeega ayaa la xiriiri doona ODDS si loo qorsheeyo shuruudaha u qalmida Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah, taasi oo ah qiimeyn lagu eegayo in aad u qalanto adeegan. Farriin qoraal ah ayaa loo diri doonaa isku duwahaaga adeega si loo muujiyo haddii aad u qalanto iyo inta saacadood ee kalkaalinta.</p> <p><u>Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka (PBS):</u> Kooxda Qorshahaaga Taageerada Shakhsi (ISP) ayaa dib kuula eegi doonta wixii codsi ama baahida loo qabo Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka iyada oo qayb ka ah qorsheyntaada ISP ee guud ama loogu talagalay baahiyahaaga taageerada joogtada ah.</p>
<p>Sidee buu daryeel bixiyahaygu ku ogaanayaa in aan u qalmo Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) ama Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka (PBS)?</p>	<p><u>Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS):</u> Haddii uu isku duwahaaga adeegu helo farriin qoraalka ah ee DNS oo xaqiijinaysa u qalmida, waxay la xiriiri doonaan daryeel bixiyahaaga guryaha koox ahaanta loo degan yahay iyada oo qayb ka ah ka caawintaada in aad doorato kala doorashadaada.</p> <p><u>Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka (PBS):</u> Isku duwahaaga adeega, kooxda ISP iyo daryeel bixiyaha ayaa kula shaqeyn doona si loo go'aamiyo baahida loo qabo PBS iyada oo qayb ka ah ISP aad leedahay ama taageerooyin joogto ah.</p>
<p>Haddii aan u baahanahay Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) ama adeegyada Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka (PBS), sidee baan u heli karaa iyaga?</p>	<p><u>Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS):</u> Marka la go'aamiyo in aad u qalanto, oo aad go'aansatay ka uu yahay daryeel bixiyaha (yaasha) DNS ee aad jeclaan lahayd in ay ku taageeraan, isku duwaha adeega ayaa la xiriiri doona, qorsheyn doona oo isku dubaridi doona bixinta adeegyada. Waxa kale oo lagu qeexi doonaa ISP aad leedahay.</p>



Kala saarida/Socida: Adeegyada Kalkaalinta Tooska ah (DNS) & Xirfadlaha Adeega Hab-dhaqanka

Su'aal	Jawaab
	<p><u>Xirfadlayaasha Taageerooyinka Hab-dhaqanka (PBS):</u> Marka la go'aamiyo in aad u qalanto, maamulahaaga kiiska ayaa kaa caawin doona in aad go'aansado ka uu yahay daryeel bixiyaha(yaasha) PBS ee aad jeclaan lahayd in ay ku taageeraan, iyada oo isku duwaha adeegu uu la soo xiriiri doono, qorsheyn doono oo isku dubaridi doono bixinta adeegyada. Waxa kale oo lagu qeexi doonaa ISP aad leedahay.</p>

